



# Diiradda la saarayo: Qalabka caafimaadka

Mararka qaarkood, waxaad u baahan tahay qalab gaar ah si uu kaaga caawiyo in aad hesho oo ku sugnaato caafimaad. Tani waxaa loo yaqaan qalabka daawada ee waara (DME). Waa mid "waara" sababta oo ah looma isticmaalo sida agabyada kale. **Qalabkani waxaa si buuxda caymiskii u bixisa CareOregon.**

**Halkan waxaa ku qoran tusaalooyi nka qalabka caafimaad ee caymiskooda la bixiyo:**



Kuraasta curyaanka



Sariiraha isbitaalka



Kuraasta musqulaha



Qalabka cadaadiska dhiigga ee gacanta lagu xirto 'cuffs'



Qalabka socodka 'walkers'



Kabaha sonkorowga



Haamaha Oksijiinka



Iyo kuwo kale oo badan

## Sidee baan u helaa qalab caafimaad?

Waxaad u baahan tahay oggolaansho si aad u hesho qalab. Halkan waxaa ku qoran sida wax loo bilaabo:



### Tallaabada koowaad:

#### La hadal adeeg bixiyahaaga

Qalabka caafimaadka waa in uu ansixiyaa bixiyaha caafimaadka jirka, ilkaha ama maskaxda. Wuxuu kuu qori doonaa waxyaabo la isku qoro oo loogu talagalay qalab.



### Tallaabada labaad:

#### Hel shirkad

Marka aad hesho waxyaabaha la isku qoro, u qaado dukaan bixiya qalabka aad u baahan tahay. Adeeg bixiyahaaga ayaa kuu sheegi doona halka la aadayo.



### Su'aalaha?

#### Na soo wac

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan halka iyo sida loo helo qalab, Adeegayaga Macmiilka ama kooxda isku duwida daryeelka ayaa wax caawin karta. Wac 800-224-4840 ama TTY 711, ama farriin ammaan ah noogu soo dir [careoregon.org/portal](https://www.careoregon.org/portal)

# Wax ka ogow CareOregon

Faa'iidooyinkaaga caafimaadka, oo uu ku jiro qalabka caafimaadku, waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

## Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

**Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

Oregon  
Health  
Authority

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

health  
share  
Health Share of Oregon

**CareOregon** waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee loogu talagalay xubnaheena.

CareOregon

**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.



### CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

### Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

[careoregon.org](http://careoregon.org)

health  
share  
Health Share of Oregon

CareOregon®